*Guddida Maraykanka ee Xorriyadda Diimeed ee Caalamiga ah (USCIRF) waa hay'ad ka gaar ah kana duwan Waaxda Arrimaha Dibadda. Waxa abuuray Kongareeska Maraykanka, waa madaxbannaan tahay, waxayna wada sameeyeen guddida la-talinta dawladda Maraykanka ee la socda xorriyadda diimeed adduunka oo dhan waxayna talobixin ka siiyaan Madaxwaynaha, Xoghayaha Arrimaha Dibadda, iyo Kongareeska. USCIRF wuxuu ku saleeyaa talobixinahan shaqadayada sharciyeed iyo halbeegyada ku yaala Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha iyo dokumentiyada kale ee caalamiga ah. Warbixin Sannadeedka 2016 waxay u taagan tahay dulucda shaqada sannadka ay qabteen Guddoomiyayaasha iyo shaqaalaha xirfadlayaasha ah si ay u diiwaangaliyaan gabboodfallada jira una gudbiyaan talobixin madaxbannaan dawladda Maraykanka. Warbixin Sannadeedka 2016 waxay daboolaysaa muddada u dhaxasaysay Febraayo 1, 2015 ilaa Febraayo 29, 2016, in kastoo xaaladaha qaar dhacdooyin muhiim ah oo dhacay kadib wakhtigan gudihiisa lagu xusay*.

## Geeska Afrika

Xadgudubyada xorriyadda diimuhu waxay ku badan yihiin waddamo dhawr ah gobolka Geeska Afrika. Sidii hore loogaga hadlay warbixintan, USCIRF waxay sii waddaa inay ku taliso in loo aqoonsado Eletariya iyo Suudaan inay yihiin "waddamo si gaar ah warwar looga qabo" sababtuna waa xadgudubyada xorriyadda diimeed ee nidaamsan, socda, ee waliba foosha xun ee dawladduhu ku kacayaan. Sidoo kale, Itoobiya, Kiiniya, iyo Soomaaliya waxa ka jira xadgudubyada xorriyadda diimeed. Ururka argagixisada ay dawladda Maraykanku ku tilmaanto ee al-Shabaab ayaa ka masuul ah qaar badan gabboodfallada ka dhacaya Kiiniya iyo Soomaaliya. Hase yeeshee, jawaabaha dawladaha Itoobiya iyo Kiiniya ay ka bixiyaan argagixisada iyo xagjirnimada diimeed ee sii kordhaysa sidoo kale waxay horseedeen xadgudubyo xorriyadda diimeed. Soomaaliya marka la eego, u-dulqaadasho la'aan diimeed oo ka imanaya xagga dawladda iyo bulshada ayaa gacan ka gaystay taariikhda xorriyadda diimeed ee waddankaas.

### Soomaaliya

***Sooyaalka:*** Dawladda Fadaraalka ee Soomaaliya, oo ah dawladda kumeel gaadhka ah ee wakhtigan, waxa la aasaasay Ogosto 2012. Janaayo 2016, hoggaamiyayaasha siyaasadeed ee Soomaalida ayaa ku heshiiyey in dawlad rasmi ah loo dooran doono inay awoodda qabato doorashooyinka Ogosto 2016. 2015, hay'adaha kumeel gaadhka ah ayaa sii waday dadaalka khilaafka badan si ay u sameeyaan dawlad fadaraal ah, maamullo goboleedyada kumeel gaadh ahna wali waxay u halgamayaan inay aasaasaan maamul.

***Dastuurka Kumeel Gaadhka ah:*** Dawladda Soomaalidu waxay sii waddaa inay dib-u-eegto dastuurka kumeel gaadhka ah, kuwaasi oo ay kujiraan tiro qodobbo ah oo aan waafaqsanayn xorriyadda diimeed. Dastuurku wuxuu si cad u mamnuucayaa diin-k-bixista wuxuuna ku sheegayaa Qur'aanka iyo Sunnaha inay yihiin meesha aasaaska u ah sharciga waddanka.

***Dulqaadasho La'aanta Bulsheed iyo Dawladeed:*** Soomaalidu ugu dhawaan waa Muslimiin Sunni ah dhammaantood. Dadka kiristaanka ah Soomaaliya waxa cadaadiyaa qoyskooda iyo bulshadooda. Musheekhda iyo al-Shabaab waxay sheegeen in Diinta Kiristaanka, Dadka Kiristaanka, iyo kiniisaduhu ay liddi ku yihiin Soomaaliya. Dawladda Soomaalidu sidoo kale

waxay sidoo kale u muujisay dulqaad la'aan Dadka Kiristaanka ah. 2013 iyo 2015, saraakiisha dawladdu waxay ku dhawaaqeen, oo markii dambena ka laabteen, mamnuucis lagu soo rogay dabbaaldegyada Ciidda Kiristanka waddanka.

Arrimaha dhawaana, Muslimiinta Shiicada ah ayaa lagu dhibaateeyey Soomaaliya intii wakhtiga tabinta lagu jiray. Diisambar 23, hay'adaha dawladdu waxay xidheen oo dhoofiyeen laba qof oo reer Iiraan ah, iyadoo lagu eedeeyey inay diin faafinayeen. Janaayo 2016, dawladda Soomaalidu waxay soo afjartay xidhiidhkeedii Iiraan. Janaayo 12, qaaddi reer Somaliland ah ayaa ganaaxay oo xabsi ku xukumay laba qof oo reer Baakistaan iyadoo sababtu tahay inay faafinayeen Shiiconimo.

***Al-Shabaab:*** Al-Shabaab (sidoo kale loo yaqaan Xarakada Shabaab ee Mujaahidiinta ah, Dhaqdhaqaaqa Al-Shabaab ee Mujaahidiinta ah, Dhaqdhaqaaqa Dhallinyarta Mujaahidiinta ah) waxay Soomaaliya kaga soo shaac baxeen garabka milatariga ee Maxkamadaha Midoobay ee Islaamiga ah (UIC) 2006. Ahdaafteeda la sheegay waa inay ka dhigaan Soomaaliya dawlad Islaami ah, inay dhisaan Soomaali wayn oo ay kujiraan meelaha waddamada jaarka ah Soomaalidu ay ku badan yihiin, oo ay faafiyaan Islaamkooda adadag. Ilaa 2007, al-Shabaab waxay la dagaalamaysay ciidamada Soomaalida iyo kuwa gobolka ololaha ay ugu jirto inay maamusho Soomaaliya, iyadoo mararka qaar haysatay dhul ballaadhan oo ah gobollada badhtamaha iyo koonfurta waddanka.

Febraayo 2012, waxay ku biireen Al-Qaacida. 2015, qaybsan ayaa ka soo baxay al-Shabaab taabacsanaanteeda Al-Qaacida, iyadoo koox yar oo ka tirsani ay raadinayeen inay ku biiraan ciidamada Dawladda Islaamiga ah iyo Shaam (ISIL). Oktoobar 22, hoggaamiye sare oo al-Shabaab ah Sheikh Abdiqadir Mumin iyo 20 ah saaxiibadii ayaa ku biiray ISIL. Arrinkaas dartiis, al-Shabaab waxay xidhay oo ay dishay qaar kamid ah kuwa ISIL taageeray, iyadoo sii joogtaynaysa taabacsanaanteeda al-Qaacida.

Intii lagu jiray wakhtiga tabinta, xaaladda ammaanka ee badhtamaha iyo koonfurta Soomaaliya waxay sii ahayd mid aad u kacsan. Al-Shabaab waxay fulisay weeraro badan oo ay ku qaadday Ciidamada Midawga Afrika ee Soomaaliya (AMISON), ciidamada qaranka Soomaaliya, dad rayid ah oo jooga badhtamaha iyo koonfurta Soomaaliya sidoo kalena waxay weeraro goosgoos ah ku qaadeen is-maamul goboleedka Puntland. Muqdisho dhexdeeda, qaraxyada al-Shabaab waxa ku dhintay saraakiil dawladda Soomaaliya ka tirsan, wakiilo caalami ah, iyo dad rayid ah oo Soomaali ah. Kooxdu waxay shirqool dil u gaysatay saraakiil dawladda ka tirsan iyo saaxiibadood oo ay u aragto inay yihiin qaar aan Muslimiin ahayn ama riddoobay. Sidoo kale, al-Shabaab waxay sii wadday inay si axmaqnimo ah u fuliso fasiraaddeeda xagjirka ah ee sharciga Islaamka, iyadoo dilaysa Dadka Kiristaanka ah iyo kuwa lagu eedeeyey "sixir." Maleeshiyaadku sidoo kale waxay karbaasheen dad lagu eedeeyey kufsi iyo gogol-dhaaf.

## Kiiniya

***Sooyaalka:*** Dastuurka Kiiniya iyo shuruucda kale waxay ilaaliyaan xorriyadda diimeed, oo ay kujirto inay muujistaan wixii diin ama aaminsanaan ah iyagoo u maraya caabudid, ku-dhaqan, baris, ama qaddarinta, oo uu mamnuucaa takoorta diimeed. Hase yeeshee, dadaalo dawladdu

kaga jawaabaysay al-Shabaab ayaa keenay bartilmaameed baaxad wayn iyo ciqaab-wadareed ee muwaadiinta Soomaalida ah, asalkoodu Soomaalida yahay, iyo Muslimiinta kale.

***Al-Shabaab***: Oktoobar 2011, Kiiniya waxay u dirtay milatarigeeda Soomaaliya si ay uga hortagaan guulaha al-Shabaab ee waddankaas. Al-Shabaab waxay kaga jawaabtay iyadoo ku baahisay weeraradeeda gudaha Kiiniya, oo ay kujirto weerarkii suuqa tukaamaysiga Westgate ee Sibtambar 2013, ololihii degmooyinka Lamu Tana River, oo dhan Juunyo-Luulyo 2014 shanta toddobaad socday, iyo daraasiin kale oo wareero argagixiso ah oo waddanka oo dhan ah. Kooxdu waxay dishay dad Muslimiinta iyo kuwa aan Muslimiin ahayn, laakiin argagixisada al-Shabaab waxay si joogto ah u raadiyaan inay aqoonsadaan oo ay gaar u saaraan Dadka Kiristaanka ah weeraradooda. Weerarkii ugu caansanaa ee al-Shabaab ka fulisay gudaha Kiiniya intii lagu jiray wakhtiga tabinta wuxuu ka dhacay Abriil 2 Kuuliyadda Jaamicadda Garissa; 148 arday ayaa ku dhintay weerarkii argagixiso ee ugu xumaa ee Kiiniya ka dhaca ilaa qaraxyadii Safaaradda Maraykanka ee 1998. Juunyo 8, dawladda Kiiniya waxay ku eedaysay shan qof argagixisonimo ku lugyeelashadooda dartii.

***Hawlgalka Usalama Watch***: Abriil 2014, dawladda Kiiniya waxay bilawday Hawlgalka Usalama Watch si ay u aqoonsato una xidho argagixisada al-Shabaab iyo taageerayaasheeda Kiiniya ku sugan. Hawlgalku wuxuu ka bilaabmay xaafadda Soomaalidu ku badan tahay Eastleigh ee magaalada Nayroobi, kadibna waxa lagu baahiyey gobolka waqooyi-bari ee dadka Soomaalida asalkoodu yahay deggan yihiin iyo gobolka xeebta ee Muslimiintu ku badan yihiin. Ururrada xuquuqda aadanaha ee Kiiniya iyo caalamka ayaa ku eedeeyey saraakiisha ammaanka eek u lug lahaa hawlgalku inay bartilmaameedsanayaan bulshooyinka sinji ahaan iyo diin ahaan gabi ahaanba oo galayaan gabboodfallo xuquuqda aadanaha ka dhan ah oo guud, oo ay kujiraan xidhitaano sabab la’aan ah, khasbid, hayn sharci darro ah, jirdil, layn, iyo waayis meel qofku jaan iyo cidhib dhigay. Sibtambar 2015, Guddida Xuquuqda Aadanaha Qaranka Kiiniya ee madaxabannaan ee dawliga ah (KNCHR) wuxuu sii daayey warbixin faahfaahsan oo sheegaysa ugu yaaan 4,000 oo xidhitaan ilaa Abriil 2014, oo badankoodu ah dad Soomaali ah, oo qaar badan oo kamid ah ay u dhibaatoodeen gabboodfallo daran xabsiga; boqolaal ayaa markii dambe la sii daayey oo eedaymaha loo haystayna la laalay markii caddayn loo waayey. Hay’adda La-socoshada Madaxabannaan ee Kiiniya (IPOA) iyo kooxaha xuquuqda aadanaha caalamka ayaa tabiyey in saraakiisha ammaanka la geeyey xaafadda Eastleigh ee Nayroobi iyo meelaha kale ee waddanka ay garaaceen dad badan; u dhaceen guryo, dhismayaal iyo tukaano; oo ay xoog ku qaateen lacago aad u badan. Magaalada Mombasa, saddex musheekhta ugu cadcad ee xagjirka ah ayaa shirqool lagu dilay, waxaana lagu eedaynayaa saraakiisha ammaanka Kiiniya. Sidoo kale, Mombasa, masaajiddo lagu eedeeyey xagjirnimo ayaa la xidhay oo markii dambena dib loo furay kadib muddo gaaban.

Hawlgalka Usalama Watch sidoo kale wuxuu faray dhammaan qaxootiga Soomaalida ee deggan dibadda xerooyinka qaxootiga ee Kakuma iyo Dadaab inay si dhakhso ah ugu laabtaan xerooyinka. Kadib weerarkii Jaamicadda Garissa, dawladdu waxay ku dhawaaqday qorshayaal ay ku xidhayso xerada qaxootiga Dadaal oo ay dib ugu calinayso dhammaan qaxootiga Soomaalida waddanka ku sugan waddankoodii. Dib-u-laabasho iskaa ah ayaa bilaabantay Ogosto 2015.

***Bartilmaameedsiga Ururrada Xuquuqda Aadanaha:*** Abriil 8, kadib weerarkii Jaamicadda Garissa, dawladdu waxay ku sheegtay tiro dad, ganacsiyo, iyo ururro ah inay yihiin qaar la shaqeeya ururrada argagixisada waxayna fadhiisisay xisaabahooga bangiyada. Muslims for Human Rights (MUHURI) iyo HAKI Africa ayaa kujiray liiskan. Labadan urur ee xuquuqda aadanaha ee deggan Xeebtu waxay qoreen kiisan dilal sharciga ka baxsan iyo dad la waayey oo ah qaar lagu eedeeyey tuhun argagixisonimo iyo musheekh Muslimiin ah, oo dhammaantood ay eedanayaab inay ku dhinteen gacmaha ciidamada ammaanka dawladda, waxayna ku doodeen la-xisaabtan. Ururradu waxay loolan galiyeen ficillada dawladda, oo Noofambar 12 qaaddi ayaa ka bari yeela labada kooxoodba inay xidhiidh la leeyihiin argagixiso kadib markii dawladdu ku fashilantay inay keento caddayn. Hase yeeshee, wali dawladdu ma fasixin xisaabahooga bangiyada, taasi ka hortagaysa ururradu inay shaqadooda dib u bilaabaan.

***Xukumista Bulshooyinka Diimeed:*** Janaayo 2016, dawladda Kiiniya waxay isku-dayday inay fuliso diiwaangalin bulshooyinka iyo musheekhda diimeed. Sharciga la soojeediyey wuxuu u oggolaan lahaa kooxaha diimeed inay u gudbiyaan dawladda bayaanka caqiidada iyo liis meelaha dakhligu ka soo galo, waxaana laga rabayaa sheekha inuu maro dambi la'aanta bilayska, caddaynta shahaadada uu ka qaaatay hay'ad diimeed oo la oggol yahay, marka la eego xaaladda sheekha shisheeyaha, uu bixiyo ruqsad shaqo iyo talobixin uga timi dawladdiisa. Janaayo 28, dawladda Kiiniya waa kala noqotay soojeedinta Baarlamaanka kadib diidmo uga timi kooxaha Kaatoliga, Efanjelikaalka, iyo Muslimiinta.

**Itoobiya**

***Sooyaalka:*** Itoobiya waxay leedahay taariikh fog dulqaadka diimeed iyo iskaashiga diimaha dhexdooda, dastuurkeeduna wuu ilaaliyaa xorriyadda diinta ama rumaysnaanta wuxuuna dhigayaa kala-saarista diinta iyo dawladda. 2011-2012, hase yeeshee, iyadoo ka jawaabaysa warwarka kusaabsan xogjirnimada sii kordhaysa, dawladdu waxay ku soo rogtay tarjumaadda Islaamkaee al-Ahbash bulshada Muslimiinta ah ee waddanka, oo uu kujiro in tabobar la siiyo iimaamyada; waxay farogalisay madaxabannaanida guddida wakiilada bulshada, Golaha Sare ee Arrimaha Islaamka ee Itoobiya (EIASC); kadibna waxay xidhay oo ay dacwaysay Muslimiin ka soo horjeestay ficilladan kuna kacay muddaharaadyo nabad ah.

***Dambi-ku-helista Muddaharaadyo Nabad ah:*** Luulyo 6 iyo Ogosto 3, 2015 sida ay iskugu xigaan, dawladda Itoobiya waxay dambi ku heshay oo ay xukuntay 18 hoggaamiye oo ka tirsan dhaqdhaqaaqa muddaharaadka Muslimka ee 2012. Waxa dambi looga dhigay inay qorshaynayeen inay dhisaan dawlad Islaami ah waxaana lagu xukumay toddoba ilaa 22 sano oo xabsi ah iyadoo la raacayo Baaqa La-Dagaalanka Argagaxa ee Itoobiya ee la isku khilaafsan yahay. Saraakiisha dawladda Maraykanka iyo ururrada xuquuqda aadanuhu way cambaareeyeen ku isticmaalka dawladda Itoobiya Baaqa La-Dagaalanka Argagaxa cambaynta aamusan. Sibtambar 16, wxay sii daysay lix kamid ah kuwa la xukumay.

***Korodhka EIASC La-soconayso Masaajiddada***: EIASC waa guddida wakiilka bulshada Muslimka Itoobiya, laakiin farogalinta dawladda ee ilaa 2011 qaar badan oo bulshada ah ma taageeraan (guddida) waxayna u arkaan xubaheega horjoogayaal dawladeed. Intii lagu jiray wakhtiga tabinta, EIASC waxay kordhisay maamulkeeeda bulshada Muslimiinta. Waxay

soosaartay laba oo siinaya la-socod kii hore ka wayn, iyo xiitaa lahaansho, masaajiddada Itoobiya. Amarrada waxa kamid ah xeerar faahfaahsan oo kusaabsan maamulka masaajiddada; oo siinaya hay'adda EIASC inay soosaarto qawaaniin gudadeed oo masjidku leeyahay iyo inay magacowdo shaqaalaha masjidka; iyo inay mamnuucdo kulamada, hadallada iyo wacdiyada dadwaynaha, iyo dhacdooyinka qaadhaan-ururinta la'aanta oggolaanshaha qoran ee EIASC.